

Ka baarista Cunugaaga Sunta Maarta (Balambam)

Waxa aad Ka filan karto Booqashada Dhakhtarka

Xaashida Tilmaanta Sunta Maarta #1



Baaritaanka sunta maarta ee dhiiga ayaa ah qaabka keliya ee lagu ogaan karo haddii cunugaagu qabo sunta maarta.

Ilmaha socodka bartay ee da'aha 1 iyo 2 sano ayay u badan tahay inay ku sumoobaan maarta. Ilmaha yaryar ayaa busta maarta ama jajabka riinjiga maarta leh gelin kara jirkooda waayo waxay badanaa afka gashadaan gacmaha, boonbaleyaasha ama waxyaabaha kale. Waxay sidoo kale ku ciyaaraan meelaha busta maartu taalo - sida sagxadaha guriga iyo meelaha u dhow daaqadaha.

Maarta ayaa lagu dari jiray riinjiga guryaha. Riinjiga maanta la isticmaalo malahan maar. Guryaha duqa ah ayaa wali leh riinjiga maarta. Busta kasoo baxda riinjiga hore ayaa ah qaabka ugu badan ee ilmuhu ku qaadaan sunta maarta.

Ka baar ilmahaaga jira da'aha 1 iyo 2 sunta maarta.

Maine ayaa qasab ka dhigaaya in dhammaan carruurta laga baaro maarta markay jiraan 1 sano iyo 2 sano. Kala hadal dhakhtarkaaga baaritaanka maarta dhiiga ee cunugaaga.

Ilmaha jira 3 ilaa 6 sano ayaa sidoo kale u baahan kara baaritaanka sunta maarta ee dhiiga.

Waalidiinta ayaa waydiin kara dhakhtarkooda in ilmahooda looga baaro sunta maarta. Samee baaritaanka maarta dhiiga haddii wax kamid ah waxyaabaha soo socda ay u quseeyaan adiga ama qoyskaaga.

- Cunugayga abidkiis lama baarin.
- Meesha aan daganahay waxaa la dhisay kahor 1950.
- Meesha aan daganahay waxaa la dhisay kahor 1978, dhawaan ayaana gurigayga lagu sameeyay dayactiro.
- Qof ila nool ayaa ka shaqayn kara shaqo sunta maarta leh. Tusaaleyaasha: dadka riinjiga mariya guryaha, qandaraasleayaasha, warshadaha dib u warshadeeya biraha.
- Cunugaygu wuxuu leeyahay walaal, abaayo ama daris qaba sunta maarta.
- Cunugayga ama aniga ayaa ku dhashay wadan kale.
- Cunugaygu wuxuu badanaa liqaa waxyaabo aan ahayn cunto, ama wuxuu ruugaa qashinka daaqada.

Sidee sunta maarta dhiiga loo baaraa?

Baaritaanka dhiiga ilmaha ayaa laga qaadi karaa midkood farta gacanta ama farta cagta (baaritaanka dhiig ka qaadidda fiidda farta) ama dhiig laga qadaayo xididka (baaritaanka xididka).



Baaritaanka Xididka (Gacanta)



Baaritaanka Jirka (Farta)

Baaritaannada sunta maarta ee dhiiga qaarkood ayaa lagu sameeyaa isla xafiiska dhakhtarka. Dhakhaatiirta kale ayaa ku siin kara risiidka shaybaarka si dhiiga lagaaga qaado shaybaarka. Keen risiidkaan shaybaarka marka cunugaagu uu u yimaado baaritaanka maarta.

Waxa aad samaynayso kadib baaritaanka maarta dhiiga?

Waydii dhakhtarkaaga natiijooyinka. Haddii baaritaanka farta laga qaaday uu sareeyo, cunugaaga ayaa u baahan doona baaritaanka xididka si loo helo natiijo sugan. Haddii maarta dhiiga laga qaaday xididku sarayso, Waaxda Kahortada Sunta Maarta ee Ilmaha ee Maine ayaa kaala shaqayn doonta helitaanka waxa keenay maarta saraysa ee dhiiga ee dhiiga cunugaaga. Baaritaannada dhiiga ee maarta oo dabagal ah ayaa loo baahan doonaa si loo xaqiijiyo in heerka sunta maarta cunugaaga hoos u dhacayso.

Ilaali qoyskaaga.

- Booqo webseedkaan: maine.gov/healthyhomes
- Wac si lagu siiyo talo: **866-292-3474** • TTY: **Wac Maine Relay 711**

